

Qorshe ku saabsan dib u furid tartiib-tartiib ah

Maadaama ay dadka la tallaalay sii kordhayaan waxa loo baahan yahay qorshe guud oo ku saabsan debcinta tallaabooyinka ka hortagga faafitaanka ee heer qaran ah, iyo in bulshada dib loo furo iyadoo loo samaynayo si tartiib-tartiib ah.

Kaddib talooyin laga helay Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI), waxa ay dawladdu go'aamisay qorshe ku saabsan dib u furista bulshada oo heer-heer ah. Qorshuhu waxa uu ka ambaqaadayaa heerkii tallaabooyinka ka hortagga faafitaanka ee jiray ka hor 25. Maarso.

Qorshuhu waxa uu ku saabsan yahay in si marba heer ah loo yareeyo tallaabooyinka ka hortagga faafitaanka ee heerka qaran ah. Maadaama walaacyo badan ka jiraan arrimaha saamaynta ku leh safmarka waxa la rabaa in qorshaha dib u eegis lagu sameeyo bisha Juun ama ka hor.

Hay'adaha ku shaqada leh ayaa ku taliyey in heerka koowaad ee dib u furista la bilaabo marka la xakameeyo safmarka. Taas oo ah marka faafitaanka cudurka iyo culaysyada ka imanaya cudurku ay muddo saddex toddobaad ah joogaan heer hoose oo deggan. Dawladdu waxa ay eegi doontaa saddex meelood oo lagu salayn doono dib u furista: sida xaaladda faafitaanka cudurku isu beddesho, awoodda daryeelka ee adeegyada caafimaadka iyo tirada dadka la tallaalay.

Si aanay xaaladdu faraha uga bixin waxa loo baahan yahay in la eego natiijada ka soo baxda heer kasta, ka hor inta aan loo gudbin heerka ku xiga. Muddo ah ku dhawaad saddex toddobaad ayaa loo baahan yahay si loo sameeyo fallanqaynta xogta iyo qiimayn, ka hor intaan la go'aamin in loo gudbo heer kale: Xogta ayaa ka horreysa taariikhda.

Shaxda halkan ku lifaaqan waxa aad ka arki kartaa tallaabooyinka la debcin doonno marka lagu jiro heerarka kala duwan.